Su'aalaha Inta Badan La Iska Weydiiyo Shuruudaha Tababarka Ee

Shaqaalaha Taageerada Gaarka ah

Shuruudaha tababarka

Waxaan daryeelayay xubin qoyskayga ka tirsan sannado badan. Iyaga keliya ayaan u shaqeeyaa. Maxay tahay sababta aan u qaadanayo tababarka?

Sharcigu wuxuu uga baahan yahay tababar dhammaan shaqaalaha, xitaa haddii ay u shaqeeyaan xubin qoyska ah. Xubnaha qoysku si fiican bay u yaqaanaan qofka ay taageeraan. Tababarku wuxuu caawiyaa hubinta in qofka la taageerayo uu helo daryeelka ugu wanaagsan ee suurtogalka ah, iyadoon loo eegayn cidda taageerayso.

Waxaan ahaa shaqaale sannado badan. Maxay tahay sababta aan u qaadanayo tababarka?

Tababarku wuxuu faa'iido u leeyahay adiga iyo cida aad u shaqayso. Waxaad haysataa dhammaan macluumaadka aad ugu baahan tahay iyadoo loo marayo tababar si aad si badqab leh ugu bixiso adeegyo tayo leh oo aad u barato hababka ugu wanaagsan ee hadda jira.

Shaqaaluhu waa inay u hoggaansamaan shuruudaha qalabka ilaalinta shaqsiga.

Hadafku waa in qof walba la siiyo tababar aasaasi ah. Markaa, waxaa jira heerar daryeel oo laga oonayao qof kasta oo reer Oregon ah.

Sharciga la ansixiyay 2018 wuxuu uga baahan yahay dhammaan shaqaalaha inay qaataan tababar.

Anigu waxaan ahay shaqaalaha daryeelka guriga iyo shaqaalaha taageerada gaarka ah. Miyaan ku khasbanahay inaan qaato dhammaan tababarka loo baahan yahay laba jeer?

Maya. Markaad dhammayso tababarka loo baahan yahay waxaad heli doontaa dhibco tababar sida shaqaalaha daryeelka guriga iyo shaqaalaha taageerada gaarka ah.

Si joogto ah uma bixiyo adeegyo. Miyay tahay inaan weli qaato tababarka?

Haa. Sharcigu wuxuu uga baahan yahay tababar dhammaan shaqaalaha, iyadoon loo eegin inta jeer ee ay shaqeeyaan.

Taariikhda tababarka

Shaqaaluhu waa inay u hoggaansamaan shuruudaha qalabka ilaalinta shaqsiga.

Waxaan ahay tababare shaqo ee PSW. Miyaan weli u baahanahay inaan qaato tababarka?

Haa. Tababarrada loo baahan yahay waxay daboolaan mawduucyo gaar ah si loogu shaqeeyo shaqaalaha taageerada gaarka ah ahaan. Tababarka aad ku helaysid tababare shaqo ahaan wuxuu gaar u yahay inaad noqoto tababare shaqo ee PSW.

Waxaan haystaa shahaadada Nidaamka Wax-ka-qabashada ee Oregon (OIS). Miyaan weli u baahanahay inaan qaato tababarka?

Haa. Tababarka loo baahan yahay waxaa ku jira mawduucyo gaar ah oo dhammaan shaqaaluhu ay tahay inay qaataan:

Waxaan tababar ka qaatay OHCC. Miyaan weli ku khasbanahay inaan tababar ka qaato Carewell?

Haa. Carewell waxay bixiyaan tababarka loo baahan yahay. Xitaa haddii aad casharo ka qaadatay OHCC, waa inaad qaadataa Tababarka Naqtiinta ah oo aad dhammaystaa waxbarashada socota adoo u maraya Carewell.

OHCC waxay bixiyaan tababarka ıs-xilqaanka ah ee loo baahan yahay si loo helo shahaadooyinka OHCC.

Tababarka aan ka qaatay OHCC ma lagu xisaabin shuruudaha tababarka cusub?

Maya. Kaliya tababarka ay bixiso Carewell ayaa buuxiya shuruudaha tababarka. Si kastaba ha noqotee, haddii aad haysato shahaadada OHCC, ma ahan inaad tababarka ka qaadato Carewell, tani waxaa ku jira shahaadooyinkaan:

- Shahaadada Horumarinta Xirfadeed (PDC)
- La xoojiyay
- Gaar ah
- Shaqaalaha caafimaadka ee dhaqameed
- Curyaanka Ku Tiirsan Hawo-siiyaha (VDQ)

Waxaan leeyahay aqoonta kalkaaliye caafimaad (ama CNA). Ma inaan qaataa tababarka?

Haa. Tababarka loo baahan yahay waxaa ku jira mawduucyo gaar ah oo dhammaan shaqaaluhu ay tahay inay qaataan.

Waxaa laga yaabaa inaad rabto inaad tixgeliso helitaanka Shahaadada Horumarinta Xirfadeed (PDC). Haddii aad haysato liisan kalkaaliye caafimaad ama aad tahay CNA, OHCC waxay dhaaftaa qaar ka mid ah shuruudaha tababarka ee shahaadaynta. Haddii aad haysato PDC, uma baahnid inaad ka qaadato tababarka loo baahan yahay Carewell.

Waxaan u qaatay tababarka oo dhan si aan u noqdo xirfadlaha taageerada tooska ah (DSP). Ma inaan qaataa tababarka?

Haa. Tababarka loo baahan yahay waxaa ku jira mawduucyo gaar ah oo dhammaan shaqaalaha taageerada gaarka ah ay tahay inay qaataan.

Ma jiraan wax ka-dhaafitaanka qaadashada tababarka ah?

Haa. Waxaa jira hal ka-dhaafitaan. Uma baahnid inaad ka qaadato tababarka loo baahan yahay Carewell haddii aad haysato shahaadada OHCC. Kaliya waxaad u baahan tahay inaad qaadato tababarka loogu baahan yahay shahaadayntaada. Shahaadooyinka waxaa ka mid ah:

- Shahaadada Horumarinta Xirfadeed (PDC)
- La xoojiyay
- Gaar ah
- Shaqaalaha caafimaadka ee dhaqameed
- Curyaanka Ku Tiirsan Hawo-siiyaha (VDQ).

Waxaan haystaa shahaadada CPR iyo shahaadada Gargaarka Degdegga ah. Miyaan weli u baahanahay inaan qaato tababarka?

Haa. Tababarka loo baahan yahay waxaa ku jira mawduucyo gaar ah oo dhammaan shaqaaluhu ay tahay inay qaataan.

Shaqaaluhu waa inay u hoggaansamaan shuruudaha qalabka ilaalinta shaqsiga.

Helitaanka

ODHS ma oggolaan doonaan saacado badan in lagu jiro eXPRS si loo tababarto?

Maya. Saacadaha ay oggol yihiin ODHS waxaa keliya loogu talagalay adeegyada tooska ah ee aad siiso shaqo-bixiyahaaga.

Miyaan ku khasbanahay inaan bixiyo kharashka tababarka?

Maya. Tababarka oo dhan waa lacag la'aan.

Waa maxay qaabka tababarka?

Tababarku waa isku-dhafka casharro iskaa loo barto iyo siminaaro onlayn ah oo wakhtiyeysan. Marka tababarka fool-ka-foolka ah uu mar kale bilaaban karo, siminaarada onlaynka ah waxay noqon doonaan tababar lagu qaato fasalka.



Shaqaaluhu waa inay u hoggaansamaan shuruudaha qalabka ilaalinta shaqsiga.

Casharrada onlaynka ah waxaa la heli karaa 24 saacadood maalintii, toddoba maalmood toddobaadkii. Waad bilaabi kartaa oo joojin kartaa tababarka mar kasta oo aad rabto.

Siminaarada onlaynka ah waxay baxaan waqtiyo iyo taariikho kala duwan, oo ay ku jiraan fiid walba iyo isbuucyaaqo walba.

Waxaad haysataa waqti badan oo aad ku qaadato Tababarka Naqtiinta ah. Waxaad haysataa ilaa Maarso 31, 2022, si aad u qaadato tababarka. Si kastaba, waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad kaqaybqaadato tijaabada bilaabatay gudaha Febraayo 2021. Tijaabada waxaa laga heli karaa gobolka oo dhan.

Maxaa dhacaya haddii aanan haysan waqti aan ku qaato tababarka maadaama aan shaqeeyo waqti buuxa ama aan heli karin fasax si aan tababarka u qaato?

- Casharrada onlaynka ah waxaa la heli karaa 24 saacadood maalintii, toddoba maalmood toddobaadkii. Waad bilaabi kartaa oo joojin kartaa tababarka mar kasta oo aad rabto.
- Carewell waxay bixisaa siminaaro onlayn ah waqtiyo iyo taariikho kala duwan, oo ay ku jiraan fiid walba iyo isbuuc-yaaqo walba.
- Waxaad haysataa waqti badan oo aad ku qaadato Tababarka Naqtiinta ah. Waad bilaabi kartaa hadda waxaadna haysataa ilaa Maarso 31, 2022 si aad u dhammayso.

Miyaan qaadan karaa tababarka isla waqtiga aan u shaqeynayo macmiil?

Maya. Waa inaad qaadataa tababarka marka aad shaqada ka baxdo.

Ka waran haddii aanan dhammaynin tababarka la iiga baahan yahay?

Waa inaad dhammaysaa dhammaan tababarrada lagaa rabo si aad u haysato lambarkaaga daryeel bixiye oo aad u sii wado u sii shaqaynta shaqo–bixiyeyaasha.

Maxaa dhacaya haddii aanan haysan kombiyuutar?

- Waxaad isticmaali kartaa tablet ama telefoon casri ah si aad tababarka u qaadato.
- Carewell waxay bixiyaan qaabab kale oo tababarka loo qaato oo loogu talagaly kuwa aan haysan kombiyuutar ama adeegga internet-ka. Waxaad kala xiriiri kartaa Carewell 1-844-503-7348 si aad wax badan uga ogaato qaababka kale.

Maxaa dhacaya haddii aanan haysan internet?

Carewell waxay bixiyaan qaabab kale oo tababarka loo qaato oo loogu talagaly kuwa aan haysan kombiyuutar ama adeegga internet-ka. Waxaad kala xiriiri kartaa Carewell 1-844-503-7348 si aad wax badan uga ogaato qaababka kale.

Maxaa dhacaya haddii aan u baahdo fududaynta ADA si aan u qaato tababarka?

Carewell ayaa kaa caawin karaan fududaynta ADA. Fadlan kala xiriir Carewell 1-844-503-7348 si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

Ma jiraa tababar luuqado kale ku baxo?

- Tabbaraka waxaa lagu heli karaa luqado badan.
- Waqti xaadirkan, Carewell waxay bixisaa adeegyo turjubaan oo loogu talagay tababarka.

Sideen ku ogaan doonaa goorta iyo meesha tababarka lagu qaadanayo?

- Waxaad macluumaad ka heli doontaa Carewell iyo OHCC.
- Waxaad iska diiwaangelin kartaa tababarka mareegta Carewell, CarewellSEIU503.org/training.

Miyaan ka arki doonaa taariikhdayda tababarka Carewell Diiwaanka?

Maya. Carewell waxay adeegsadaan nidaamkooda maareynta waxbarashada si ay ula socdaan tababarka aad qaadato. Way ogeysiin doonaan OHCC markaad buuxiso shuruudaha tababarkaaga.

Waxaad ku heli kartaa dukumintigan luuqado kale, daabacaad ballaaran, farta indhooleyaasha ama qaabka aad doorbidayso. Kala xiriir Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon 877-624-6080. Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaanada dadka hadalku dhibayo ama waxaad wici kartaa 711.

Oregon Department of Human Services | Oregon Health Authority | Oregon Home Care Commission | Carewell Training SEIU503